IIB MA GALO

AAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

ınadka 5aad Muqdisho, 1 Jannaayo 1977, L. 1

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.

AAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

IMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya deheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba . — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L.1 ee 13 Dis. 76, *Toosin ku saabsan Sharciga L. 55 ee 4.10.76,* Bogga 3

SHARCI L. 2 ee 13 Dis. 1976, *Toosin ku saabsan Sharciga L. 38 ee 5.4.1972,* » 5

SHARCI L. 3 ee 15 Dis.1976, *Sharci ku saabsan Hantiwadaagga Naadiyada Isboortiga Soomaaliyeed.* » 6

SHARCI L. 4 25 Dis. 1976, *Meel marin Heshiis.* » 13

SHARCI L. 4 ee 25 Dis. 1976, Nupul Carabi ah. » 13/bis

SHARCI L. 5 ee 30 Dis 1976, Meel marin heshiis. » 14

LAW No. 5 30 Dis.1976, *Instrument of Ratification.* » 15

SHARCI L. 6 ee 5 Jannaayo 1976, *Abuuridda Guddiga gaarka ah ee Arrimaha Badda iyo Waaxdiisa.* » 16

## BOGGA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 20 Oktoobar *1976, Sago ka saarid Xiddigle Aadan Cali Faarax* L. 1 » 19

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Muqdisho

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 25 Disember 1976, *Cusbooneysiin Rupsadda Sahanka Betroolka, L. 2* » 20

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 4 Agoosto 76, *Dhul Dawladeed la siiyey gacantana loo geliyey Dhul Dawladeed la siiyey gacantana loo geliyey (Libera Disponibilità) Jaalle «Edna» Shukri Aadan Ismaaciil — ku yaal Muqdisho — Xaafadda Hodan kuna fadhiya mq. 1254 Cad dhul dawladeed gadatay Jaalle Aamina Sheekh Maxamed — kuna yaal Muqdisho Xaafadda Hodan kuna fadhiya mq. 1.320. L.3* » 21

XEER WASAARADDA GANACSIGA ee 20 Oktoobar 1976, *Cad dhul Dawladeed, la siiyey Jaalle Geedi Raaga Xasan ku yaal Muqdisho Xaafadda Hodan Jidka 26 Juunyo kuna fadhiya mq.* **445,50** *L. 4 yaha Minreaale L. 5* « 24

XEER WASAARADDA GANACSIGA ee 20 Oktoobar 1976, *Qiimaha ay ku iibinayso Warshadda Aiba Biyaha mineraalka L. 5* » 25


## BOGGA SADDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH


MAXKAMADDA BOGOLKA BANAADIR, 5.8.76, *Lumid Jeegga* W. *lam. 92977 ku qoran Sh. SO. 17.400 ay leedahay Aamina Cilmi Bulxan L. 1* » 26

MAXKAMADDA DEGMADA QARDHO 29.11.76, *Lumid Jeegga W. Lam. 19838 ku qoran Sh. SO. 305 u leeyahay Axmed Weyrax Maxamuud L.* **2** » 27

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 5.1.77, *Lumid Buugga kaydka L. 7403 ku qoran Sh. SO. 15.618 uu leeyahay Xuseen Faarax Siyaad L.* **3** » 28

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE, *Lumid Buugga kaydka L. 1 ku qoran Sh. SO. 1.800 uu leeyahay Cabdullaahi Maxamed Maxamuud L. 4* » 29

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.12.76 *Lumid Buugga L. 11575 ku qoran tahay Sh. SO 300 uu leeyahay Cabdi Yuusuf Kulan L. 4/Bis* » 30

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 2.1.77, *Lumid Jeegga Wareeg L.514705 ku qoran Sh. SO. 11.000 uu leeyahay Jaalle Maxamed Cabdi Geelle L. 4/Bis* » 31




# BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

SHARCI L.1 ee 13 Dis 76, Toosin ku saabsan Sharciga L. 55 ee 4.10.76,

M A D A X W E Y N A H A

J. D. S.

*ISAGOO ARKAY:* Xaashida 1aad, 2aad iyo tii 3aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lam. 55 ee soo baxay 4tii Oktoobar 75, laguna dhisay Guddi gaar ah oo loo xilsaaray dhammaynta dacwadaha dhaxalka oo aad ugu daahay Maxkamadaha caadiga.

ISAGOO AQOONSAN: Inay tahay lagama maarmaan in la kordhiyo Muddadii halka sano ahayd ee hore loogu tala galay inay hawshooda ku dhammeeyaan sababtoo ah hawsha loo xilsaaray ayaa aad u fara badatay.

*ISAGOO TIXGELINAYA:* Go'aankii Guddiga Siyaasadda ee XHKS, iyo Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA HOOS KU QORAN

Qodobka 1aad

1. Aayadoo la tixgelinayo hawsha loo xilsaaray Guddiga lagu dhisay Sharciga lambarkiisu yahay 55 ee soo baxay 4.10.1975 waxaa lagama maarmaan ah in la kordhiyo muddada halka sano ah ee hore loogu tala galay inay hawshooda ku dhammeeyaan ee ku qoran qodobka 4aad ee Sharciga lam. yahay 55 ee 4.10.1975.

2. Sida awgeed waxaa hal sano ee kale loogu darayaa jiritaanka Guddiga oo laga billaabo 1.1.1977.

Qodobka 2aad

1. Guddiga Caddaaladda iyo Sharciga ee lagu dhisay Sharciga L. 1 ee soo baxay 6.12.1974, waa inuu magacaabaa xubin oo ka mid noqonaya Guddiga gaarka ah ee qaadaya dacdaha Dhaxalka.

2. Xubnaha Guddiga oo tiradoodu ahayd 7 sida uu dhigayo Qodobka 1aad ee Sharciga 55 ee 4.10.1975 waxay noqonayaan 8.

3. Xubnaha Guddiga waxay isla markaas qabanayaan hawlahooda caadiga ah.

Qodobka 3aad

Go'aannada Guddiga gaarka ah ee lagu dhisay Sharciga 55 ee 4.10.1975 loona xilsaaray dhammaynta dacwadaha dhaxalka waa ka-ma dambays waxayna ka reeban yihiin awoodda baarista dacwadaha ee Guddiga Caddaaladda iyo Sharciga ee ku sheegan Sharciga L. 5 ee 14.2.1976.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 1da November, 1976, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 13 Disember 1976,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Sarreeya Gaas Maxamed Siyaad Barre)*



SHARCI L. 2 ee 13 Dis. 76, Toosin ku saabsan Sharciga Lam. 38 ee 5.4.1972,

M A D A X W E Y N A H A

J. D. S.

*ISAGOO ARKAY:* Xaasihda 1aad; 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Lam. yihiin 38 ee soo baxay 4.5.1972, iyo L. 5 ee soo baxay 14.2.1976, ee ku saabsan awoodda baarista dac-wadaha ka soo dhammaaday Maxkamadaha.

ISAGOO AQOONSAN: Inay tahay lagama maarmaan in la gooyo xad muddada loogu dacwoon karo Guddiga Caddaaladda iyo Sharciga.

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aankii Guddiga Siyaasadda ee XHKS. iyo Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA HOOS KU QORAN

Qodobka 1aad

Cabashada loo qoranayo Guddiga Caddaaladda iyo Sharciga ee ku saabsan dacwadaha ka soo dhammaaday Maxkamadaha waxaa loo qoran karaa Guddiga muddo 30 maalmood gudahooda ee laga billaabo maalinta uu go'aanka dacwadda noqdo kama dambeyn (final).

Qodobka 2aad

Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon Sharcigan waa la tirtiray.

Qodobka 3aad

Sharcigani si degdeg ah buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho, 13 Dis. 1976

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

SHARCI L. 3 ee 15 Dis. 17, Sharci ku saabsan Hantiwadaageynta Naadiyaasha Isboortiga Soomaaliyeed.

M A D A X W E Y N A H A

J. D. S.

*ISAGOO ARKAY:* Xaashida 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka;

*ISAGOO AQOONSADAY:* In ay tahay lagama maarmaan in la soo saaro Sharci nidaaminaya Naadiyaasha Isboortiga, ujeeddada laga leeyahay oo ah in la dhiso bulsho caafimaad qabta oo dhaqaalaha iyo bulshada waddanka horudhiggta ama horumarisa oo ku dhisan Caddaalad iyo sinnaan, lana socota ulajeeddooyinka Kacaanka Soomaaliyeed, in la dhiso ruuxa (Spirit) Jidhka, maskaxda iyo niyadda san iyo waddaninimada bulshada Soomaaliyeed oo ay ku dheehan tahay isjacayl, waxwada qabsi, firfircooni iyo isxilqaan masuuliyeed;

*ISAGOO TIXGELINAYA:* Taladii uu soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga, oo ku dhisan Hantiwadaageynta Isboortiga Soomaaliyeed;

*ISAGOO TIXGELINAYA:* Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda ee soo baxay bishii Maarso 1976,

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

1. — Erayada hoos ku qoran waxaa loola jeedaa sida soo socota:

b. — Wasaarad; waxaa loola jeedaa Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga;

t. — Xoghaya; waxaa loola jeedaa Xoghayaha Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga;

j. — Isboorti; waxaa loola danleeyahay nooc kasta oo cayaaro ah oo uusan ku jirin Fanka;

x. — Xeerar gaar ah: waxaa loola jeedaa nidaamka u degsan Naadi kasta oo Isboorti ah kana dhisan Dalka;

kh. — Aqoonsi bixiye; waxaa loola danleeyahay qofka uu u magacaabay Xoghayuhu inuu noqdo aqoonsi bixiye gobol kasta oo dalka ka mid ah;

d. — Xeer Nidaamiye Dawladeed; waxaa loola jeedaa Xeer Nidaamiyaha lagu fulinayo Sharcigan.



Qodobka 2aad

NAADIYAASHA ISBOORTIGA

1. — Waxaa laga dhisi karaa Naadiyaal Isboorti ah Gobollada, Degmooyinka, Ciidamadda, Wasaaradaha Wakaaladaha madax bannaan,

Warshadaha Shirkadaha gaarka ah, Jaamicadaha iyo meelo kaleba oo ku habboon.

2. Naadigu wuxuu dhismi karaa markii ay isu yimaadaan ugu yaraan labaatan qof, waana inuu xirnaadaa saddex Xiriir ama saddex Kooxood.

3. Naadigu waa inuusan marna noqon Faa'iido-doon ama uusan samayn dhaqdhaqaaq Siyaasi ah.

4. Lama oggola in Naadi mid kale lagu daro ama la kala sii daayo ama wax lagu beddelo Xeerka u gaarka ah haddii ayan marka hore Shirweynaha Guud isku raacin kaddibna Xoghayuhu qoraal ahaan uusan oggolaan.

Qodobka 3aad

UJEDDOYINKA NAADIGA

1. Ujeeddooyinka laga leeyahay dhismaha Naadiyaasha waa kuwa soo socda:

b) — Inuu dhiiri geliyo Ciyaaraha Isboortiga ah ee kala geddisan, fududeeyana tababarkooda waana inuu gaarsiiyaan meel kasta ujeeddooyinkalaga leeyahay Siyaasadda Isboortiga ee dalka;

t) — Inuu ku abuuro kuna barbaariyo Ciyaartoyda Naadiga kalgaceelka Isboortiga;

j) — Inuu dhiso bulsho cusub oo caafimaad qabta, diyaarna u ah hirgelinta iyo daafaca habka hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan;

x) — Inuu soo habeeyo Barnaamijyo muujinaya horumarinta Isboortiga Naadiga.

kh) — Inuu ka qayb galo tartamo kala geddisan ee Dalka gudihiisa laga abaabulo khuseeyana xiriirada kala duwan;

d) — Inuu ku dhex faafiyo xubnaha Naadiga Faa'iidooyinka ay leedahay barashada jimicsiga iyo dhismaha jirka.

Qodobka 4aad

*(Diiwaan gelinta Naadiga)*

1. Naadi kasta oo la dhisayo waa in la diiwaangeliyaa bil gudeheeda oo laga billaabo maalinta la asaasay, ilaa la Diiwaangeliyan ma samayn karo dhaqdhaqaaq Isboorti ah.

2. Naadi kasta oo jira marka Sharcigani soo baxo waa inuu warsado aqoonsi muddo laba bilood gudahood wax dhaqdhaqaaq Isboorti ah oo abaabuli karo ma jiraan haddii afar bilood ka soo wareegti muddadii Sharcigan soo baxay, asagoo aan haysan warqad Aqoonsi ah.

Qodobka 5aad

*(Oggolaanshada diiwaan gelinta)*

1. Warqadda Warshadda diiwaan gelinta waxaa loo geynayaa bixiyaha aqoonsiga isagoo tilmaamaya Shuruudda looga baahan yahay Naadiga ee waafaqsan.
2. Bixiyaha Warqadda aqoonsiga waa inuu Naadiga warsaday siiyaa warqadda diiwaangelinta bil gudeheed haddii uu fuliyey Shuruudda looga baahan yahay.
3. Haddii bixiyaha aqoonsigu uu u diidi inuu naadiga siiyo warqadda aqoonsiga; waa inuu qoraal ahaan ugu caddeeyaa sababta diidmada.
4. Waxaa u bannaan Naadi kasta oo loo diido warqadda aqoonsiga inuu racfaan u qorto Xoghayaha, bil gudeheed oo ka billaabata markii uu warqadda diidmada helay.
5. Naadi kasta oo haysta warqadda aqoonsiga ee waafaqsan Sharcigaan wuxuu noqonayaa Naadi madax bannaan oo Shaqsiyad Sharciyeed leh, magac la tixgeliyo iyo tilmaan jiritaan ee joogta ah leh, dacwo oogi kara, isagana la dacweyn kara.

Qodobka 6aad

*Dhismaha Naadiga.*

Naadigu wuxuu ka kooban yahay:

b)— Shirweynaha Guud,

t)— Guddiga Maamulka.

Qodobka 7aad

*(Shirweynaha Guud.)*

1. Shirweynaha Guud ee Naadiga, waxaa xubno ka ah:

b) — Wakiil ka socda Wasaaradda ama Guddiga Olombiga Soomaaliyeed;

t) — Dad wakiil ka ah dadweynaha wax ka bixiyo Miisaaniyadda Naadiga oo ay soo magacawdo Hay'adda Naadiga ku xiran yahay;



j) — Dadka wakiilka ka ah laamaha naadigu ku leeyahay Gobollada iyo Degmooyinka;

x) — Wakiillo ka tirsan Taageerayaasha Naadiga;

kh) — Xubno Sharafeed Naadigu magacaabo;

2. Shirweynaha Guud ee Naadigu waxaa Guddoomiye ka noqonaya qofka madaxa u ah Hay'adda uu Naadigu raacsan yahay.
3. Habka lagu maamulayo Shirweynaha Guud waxaa caddaynaya Xeer nidaamiyaha.
4. Xeerka gaarka u ah Naadiga waxaa la horgeynayaa Shirweynaha si uu u oggolaado.

Qodobka 8aad

*(Guddiga Maamulka.)*

1. Guddiga maamulku Naadiga waxaa dooranaya Shirweynaha Guud, wuxuuna ka kooban yahay:

b) — Guddoomiye;

t) — Guddoomiye ku Xigeen;

j) — Xoghaye Guud;

x) — Kaaliye Xoghaye Guud;

kh) — Xisaabiye;

d) — Laba Xubnood.

2. Hawlaha Guddiga Maamulka waxaa caddaynaya xeerka gaarka ah ee Naadiga.

Qodobka 9aad.

*(Xeerka gaarka ee Naadiga)*

1. Naadi walba waa inuu yeeshaa xeer u gaar ah oo caddaynaya sida loo maamulayo.
2. Xoghayuhu waa inuu tilmaamo ka bixiyo sidii loo samayn lahaa xeerka u gaarka ah Naadiga.
3. Xeer gaar kasta ee Naadi samaysta waa inuu oggolaado Xoghayuhu kaddib markuu soo maro Shirweynaha Guud ee Naadiga.

Qodobka 10aad

(Awoodda Xoghayaha)

1. Xoghayaha wuxuu awood u leeyahay waxyaalaha soo socda:

b — inuu kormeero hawsha Naadiyaasha Isboortiga;

t) — inuu talooyin guud iyo tilmaamo u jeediyo Naadi kasta isagoo tixgelinaya danta guud iyo Siyaasadda Dalka;

J — Inuu baabi'iyo aqoonsi hore loo siiyey Naadi Isboorti ah markii uu jebiyo qodob ka mid ah Sharciga, xeer-nidaamiyihiisa ama Xeer gaarkiisa.

2. Inuu istaajiyo dhaqdhaqaaqa Naadiga Isboortiga ah muddo gaaban ama uu xilka ka qaado Guddiga maamulka ee markaas mas'uuliyadda haya, asagoo kala tashanaya Hay'adda Naadigu raacsan yahay ama uu magacaabo guddi ku meel gaar ah aan ka badnayn muddo 6 (Lix) bilaad ilaa laga magacaabo Guddi Maamul oo raacsan habka xeerka u gaarka ah haddii Maamulku fulin waayo Sharciga ama xeer nidaamiyihiisa, xeerkiisa gaarka ah ama go'aannada Shirweynaha.

3. Inuu baabi'iyo qaar ama dhammaan go'aannada Shirweynaha Naadiga ama Shirka Guddiga maamulka uu gaaray bil gudaheed marka laga billaabo soo gaarsiinta haddii go'aannadaasi ay khilaafsan yihiin Sharcigan ama xeer-nidaamiyihiisa.

Qodobka 11aad.

*(Xuquuqda Naadiyaasha.)*

Naadi kasta oo Isboorti ah oo la aqoonsaday wuxuu xaq u leeyahay waxyaabaha soo socda:

1. In taageero dhaqaale ah la siiyo Naadigii loo aqoonsado Xeerka koowaad, oo inta tiradeeda tahay Xoghayuhu tilmaami dooni haddii:

b) — Haddii uu Naadigu ka qayb galo Sannadkii ugu yaraan khusaysa saddex xiriir ama uu leeyahay saddex kooxood;

t) — Haddii Miisaaniyadda iyo qorshaha Naadiga ay yihiin kuwa ay ugu muuqato Xoghayuhu barnaamijyo lagu gaari karo horukac.

2. Inuu qandaraas geli karo ama ijaari karo ama gedi karo ama fahmi karo alaab kasta oo uu leeyahay ay ka mid yiyiin Aqallo ama qalab haddii loo baahdo.



Qodobka 12aad.

*(Gunnada Cayaartoyda iyo Tababarayaasha)*

1. Cayaaryahan kasta oo uu cayaara Naadiga waa inuu noqdaa mid aan ku noolayn Ciyaarta keliya ee waa inuu ahaadaa mid Shaqo kale qabta, Mushaarna ku qaata.

2. Naadigu Ciyaaryahannadu wuxuu siin karaa Gunno aan badnayn oo ka taageerta xagga nafaqada (soo celin Xooggii ka dhumay Ciyaaryahanka) Gaadiidka, Nadaafadda, Dharka iyo Daawooyinka Sahlan.

3. Ardaygii Naadi u Ciyaara waa inuu fasax ka haystaa Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga iyo Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta: saas darteed ciyaaryahankii shaqaale ah iyo Ardaygii haddii ay ka qayb galaan Ciyaar Rasmi ah waxaa la siinayaa bishiin Gunnada soo socota:

b) — Sh. SO. 200 Sh. SO. 250 Ciyaartoyda Naadiga heerka IIaad.

t) — Sh. SO. 250 Sh. SO. 350 Ciyaartoyda Naadiga Iaad.

j) — Sh. SO. 350 Sh. SO. 450 Ciyaartoyda Naadiga Qaranka.

4. Naadi ma uu qaadan karo Tababare aan xiriirku oggolaan ugu yaraanna wuxuu u siin karaa Sh. SO. 210 Lababoqil iyo toban) — ilaa Sh. SO. 500 — (shan boqol)

Qodobka 13aad

*(Miisaaniyadda.)*

1. Miisaaniyadda Naadiga waxay ka kooban tahay:

b) — Taageero dhaqaale oo ay Wasaaraddu bixiso;

t) — Deeq ay bixiyaan dadweynaha iyo Hay'adaha kala duwan;

j — Lacag ay xubnaha Naadigu ka taageeraan,

x) — Lacag ka soo gasha meelaha kala duwan oo aan sharcigan diidanayn.

2. Looma oggola naadi Isboorti inuu lacag ka uruursado Dadewynaha haddii uusan marka hore oggolaansho ka helin Wasaaradda iyo Xafiisyada dawladda ay Shaqadaas khusayso.

Qodobka 14aad.

*(Kormeeridda xisaabaadka Naadiga.)*

Xisaabaadka Naadi kasta ee Isboorti ah waxaa kormeeraysa Wasaaradda iyo madaxda Hay'adaha uu ka tirsan yahay.

Qodobka 15aad.

*(Guddiga Edbinta.)*

1. Guddiga Edbinta wuxuu ka kooban yahay:
   b) — Qof ka socda Wasaaradda;
   t ) — Qof ka socda Guddiga Olombiga Soomaaliyeed;
   j ) — Qof ka socda xiriirka ay arrimahaasi khusayso;
2. Qof kasta oo laxiriira naadi Isboorti ah oo la jebiya qodob ka mid ah Sharcigan, Xeer-nidaamiyaha ama xeerka u gaar-ka ah wuxuu Guddiga Edbinta ka qaadi karaa Tallaabooyin hoos ku tilmaaman;
   b) — Cannaan;
   t ) — Ka joojin xilka naadiga;
   j ) — Ka saarid Naadiga;
   x) — Ganaax ilaa 2000 Sh. So.

Qodobka 16aad

*(Xiriirka Naadiyaasha Shisheeyaha)*

Naadi kasta oo isboorti ah wuxuu xiriir la yeelan karaa Naadi Shisheeye, wuxuuna Casuumi karaa waana u tegi karaa, hase yeeshee waa inuu marka hore oggaansho ka haystaa Wasaaradda Shaqada iyo Isboortiga.

Qodobka 17aad.

*(Xeer Nidaamiyaha)*

Xoghayuhu wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer-nidaa-miye si loo gaaro ujeeddooyinka laga leeyahay Sharcigan.

Qodobka 18aad

*Tirtirid*

Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharci-gaan waa la tirtiray.

Qodobka 19aad

*(Dhaqan Gelid.)*

Sharcigaan wuxuu dhaqan gelayaa marka lagu soo saaro Faafin-ta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 15 Dis. 1976,

*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*
Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya



SHARCI L. 4 ee 25 Dismber 1976, Meel marin Heshiis.

*MARKUU ARKAY*: Xaashidii 1aad, 2aad ee Kacaanka 21ka Ok-toobar 1969;

*MARKUU ARKAY:* Qaanuunka Raqam 1

*MARKUU ARKAY*: Heshiiskii ku lug lahaa deyntii ku saabsanayd Horumarinta Daaqa ee Gobolka Woqooyi, dhexmarayna Jamhuu-riyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Sanduuqa Kuweyd ee ho-rumarinta Dhaqaalaha Carabta.

ISAGOO TIXGELIYEY: Go'aankii Labada Gole.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Heshiiskii dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaali-ya iyo Sanduuqa Wuweyd ee horumarinta dhaqaalaha Carabta ee ku saabsanaa horumarinta Daaqa ee gobolka Woqooyi taariikhaiisuna ahayd 29.6.76 waa la meel mariyey.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu lahaanayaa istaan sharci ah Dalka Jamhuuri-yadda Dimuqraadiga Soomaaliya ka billaabata maalintii la saxiixo.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 3.7.1976,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

القانون رقم ٤

**جمهورية الصومال الديمقراطية**

**الرئيـــس**

رقم ١

بعد الاطلاع على الميثاق رقم ١ ورقم ٢ لثورة ٢١ أكتوبر ١٩٦٩م والقانــون
وبعد الاطلاع على اتفاقية القرض الخاصة بتطوير المراعى فى الاقليم الشمالى
والمبرمة بين جمهورية الصومال الديمقراطية وبين الصنــدوق

الكويتى للتنمية الاقتصادية العربية.

وبعد الاستئناس بقرار المجلس الاعلى للثورة ومجلس الوزراء

يصدر القــانون التالى :

**يصدر القــانون التالى :**

المادة الاولى : تم التصديق على الاتفاقية المبــرمة بين جمهورية الصومال الديمقراطية وبين الصندوق الكويتى للتنمــية الاقتصاديــة العربية والخاصة بتطوير المراعى فى المحافظة الشمالية من الجمهورية والتى يرجع تاريخها الى ١٩٧٦/٦/٢٩م.

المادة الثانية : الاتفاقية لها طابع قانونى فى جمهورية الصومال الديمقراطية من يوم توقيعها .

سينشر هذا القانون على النشرة الرسمية للدولة .

مقديشو، فى ١٩٧٦/٧/٣

**اللواء محمد سياد برى**

**رئيـــس م. أ. للثـــورة**



SHARCI L.5 ee 30 Disember 1976, meel marin Heshiis.

M A D A X W E Y N A H A

J. D. S.

*ISAGOO ARKAY:* Xaashidii 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969,

*ISAGOO ARKAY:* In ay tahay lagama maarmaan in uu heshiis dhexmaro Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya iyo Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah 1973,

*ISAGOO TIXGELIYEY:* Go'aankii Golaha siyaasiga ee XHKS iyo Wasiirrada Dawladda ee ahaa 25.11.1976;

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad.

Waxaa la meel mariyey heshiiskii ka dhexeeyey Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah 1975.

Qodobka 2aad.

Heshiiska kor ku tilmaaman wuxuu yeelan doonaa astaas sharci, wuxuuna ka mid noqon doonaa Sharciyada lagaga dhaqmo jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 3aad.

Heshiiska sida ku qoran qodobka 45aad wuxuu dhaqan geli doonaa maalinta oggolaanshaha xarunta Ururka.

Waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S.

Muqdisho, 30 Dis. 1976,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

LAW No. 5 ee 30 Disember 1976, Instrument of Ratification.

PRESIDENT OF THE SOMALI D. R.

HAVING SEEN: The Ist, 2nd. and 3rli. Charters of the Revolution of 1979,

HAVING SEEN: Law No. 1. 17. 18. and 19 of Ist. July. 1976.

TAKING NOTE: Of approva. of the Political Bureau and Council of Ministers on 25th. November 1976.

Article 1

kC.OO73aa ai R t.A

The Convertion of the International Telecommunication Union signed by Somali Democratic Republic in 1973 is hereby ratified.

Article 2

This Convention shall have the force of the law in the Territory of the Somali Democratic Republic in accordance with its Article 45.

This law will be published is the Official Buletin of Somali Democratic Republic.

Muqdisho, 30 Dis. 1976,

President of the Somali Democratic Republic
*(Jaalle Mohamed Siyad Barre)*



SHARCI L. 6 ee 5 Jannaayo 1977 Abuuridda Guddiga gaarka ah ee Arrimaha Badda iyo Waaxdiisa.

M A D A X W E Y N A H A

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaanshida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lam. 17, 18, 19 ee 1.7.1976, kuna saabsan Habka Maamulka Guud ee Dawladda;

*ISAGOO ARKAY:* Sharciga Lam. yahay 37 ee 10.9.72 oo ballarka xeebta Dalka looga dhigay 200 oo mayl;

*ISAGOO AQOONSADAY:* In ay ahay lagama maarmaan in la dhiso Guddi iyo Waaxdiisa oo ka kooban dhowr Wasaaradood iyo Hay'ado Dawladda ah ee ka talisa si joogta ahaan arrimaha la xiriira Badda;

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii Golaha Siyaasiga ee XHKS.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

*(Abuurid Guddi iyo Waaxdiisa)*

Waxaa la abuuray Guddi gaar ah ee Arrimaha Badda ee Madaxtooyada Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 2aad

A) — Guddiga wuxuu hawshiisa iyo xilkiisa ahaan doonaa sida hoos ku qoran:

1. — Inuu baaro, ka qaybqaato shirarka Arrimaha Badda Dawladdana kala taliyo sharciyeynta haatan lagu wado shirka Qarammada Midoobey iyo sida ay u taabanayso ammse u waafaqsan yihiin Siyaasadda iyo danaha Ummadda Soomaaliyeed;

2. — Ururinta khibradaha Waddanka taal ee ku saabsan sharciyada Badda iyo isku duwidda Wasaaradaha iyo Wakaaladaha kala duwan ee shaqada ku leh Arrimahaas;

3. — Baaritaan iyo daraaso lagu samaynayo mayqifyada Dawladda kale iyo keenna habka ugu habboon oo danaheenna lagu fulin karo.

B) — Guddiga si hawshiisa iyo xilkiisa u guto wuxuu yeelan doonaa Waax qaab leh oo hoos imaan doona Madaxtooyada.

Qodobka 3aad

A) — Guddi gaar ah ee arrimaha Badda ee Madaxtooyada wuxuu ka koobnaan doonaa; xubnaha hoos ku qoran:

1. — Sarkaal sare ee ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed Guddoomiye.

2. — Gasoore waayo aragnimo u leh Sharciga Badda ee ka tirsan Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta Guddoomiye ku—xigeen.

3. — Qof waayo aragnimo u leh arrimaha Badda ee Wakaaladda Gaadiidka Badda Xubin.

4. — Bare ka tirsan Jaamacadda Ummadda oo arrimaha badda waayo aragnimo u leh Xubin.

5. — Qof ka tirsan waaxda ururka adduunka ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda Xubin.

6. — Qof Jeoloji ah oo ka tirsan Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha Xubin.

7. — Qof waayo aragnimo u leh Cilmiga Kalluunka oo ka tirsan Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda (Marine Science Xubin.

8. — Agaasimaha Waaxda Arrimaha badda ee Madaxtooyada Xubin

Qodobka 4aad

*(Hawsha Waaxda)*

A) — Waaxda Arrimaha badda waxay ka mas'uul noqos doontaa hawlaha soo socda:

1. — Ururinta warqadaha rasmiga ah;

2. — Habaynta iyo isu-dubbarididda hawlaha Guudiga;

3. — la socodka iyo meel marinta Go'aannada iyo talooyinka Guddiga;

4. — Hadal quraalka shirka Guddiga;

5. — Gaarsiinta amarrada Guddoomiyaha xubnaha iyo guddiga iyo wixii la mid ah.

B) — Wixii hawl ah oo la xiriira arrimaha Badda iyo wixii kale oo la mid ah Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. S. ayaa u xil saari xubnaha Guddiga.



Qodobka 5aad

*(Dhaqan—gelid)*

1. — *Sharcigu wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.*

2. — Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa F. R. ah ee dawladda.

Muqdisho, 5 Jan. 1877,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya

*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

BOGGA LABAAD

# XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 20 Oktoobar 1976, Shaqo ka fariisad Xiddigle Aadan cali Faarax, L. 1

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOAAMLIYA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tii labaad iyo saddexaad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 19769;

*ISAGOO ARKAY:* Qodobka 19aad ee Sharciga Lam. yahay 2, taariikhdiisuna tahay 23.12.1972 ee dhismaha Ciidammada Booliska.

*ISAGOO ARKAY:* Taladii uu soo jeediyey Taliyaha Ciidammada Booliska kuna soo sheegay warqaddiisi ku lambarsanayd SEC/GG 155 ee 17.8.1976,

ISAGOO ARKAY: warqaddii Madaxtooyada J.D.S. lambarkeeduna ahaa MJDS/WCQS/3-55, taariikhdiisuna ahayd 18 Oktoobar 1976 ee lagu soo oggolaaday in shaqada laga eryo Xiddigle Aadan Cali Faarax.

ISAGOO DHGEYTAY: Ra'yigii Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha kuna qornaa warqadda Lam. yahay A/C/1|3.A-2289 ee 11 Oktoobar 1976,

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In Xiddigle Aadan Cali Faarax oo ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed laga eryo shaqada Booliska asluub xumo awgeed marka laga billaabo 31 Oktoobar 1976.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

laga billaabo 31 Oktoobar 1976,
Wasiirka Arrimaba Gudaha
*(Jaalle S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalib*

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle Sareeya Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY**
**diiwaanka lam. 7 bogga lam. 199**
**Muqdisho, 21 Dic. 1976,**
**Hantidhowrka Guud**
**Gaashaanle Sare Cabdullaahi W. Nuur**



XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 25 Dis 1976, Cusbooneynsiin Ruqsadda Sahanka Betroolka L. 2

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

*MARKUU ARKAY:* Sharciga 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

*MARKUU ARKAY:* Sharciyada kala ah 17, 18, 19 ee soo baxeen 1.7.1976;

MARKUU ARKAY: Go'aankii Golaha Siyaasiga ee Xisbiga iyo golaha Wasiirrada ee 25kii Nofember 1976;

ISAGOO TIXGELIYEY: Taladii Wasiirka Macdanta iyo Biyaha.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Heshiiskii ka dhexeeyey Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Shirkadda Talyaaniga (Agib Somalia) ee ku saabsanaa Sahanka Betroolka oo ay horey u haysatey shirkaddaas waa la Cusbooneysiiyey.

Ruqsaddaas sahanka waxay socon doontaa muddo hal sano ah, marka laga billaabo14.2.1977, ayadoo khusayneysa Gobollada Bari, Nugaal iyo Mudug.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 25 Dis. 1976,

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle Sareeya Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 4. Agoosto 76, Dhul Dawladeed la siiyey gacantna loo geliyey, (Libera Disponibilità) Jaalle «Edna» Shukri Aadan Cismaaciil — ku yaal Muqdisho — xaafadda Hodan, kuna fadhiya mq. 1.254.

Cad dhul Dawladeed gadatay Jaalle Aamina Sheekh Maxamed kunat yaal muqdisho, xaafadda Hodan, kuna fadhiya mq. 1320. L. 3

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

ISAGOO ARKAY: Warqaddii 1aad iyo tii labaad ee Kacaanka iyo Xeerka Lam. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

*ISAGOO ARKAY:* Xeer Lam. 41 soona baxay 1 Nofember 1973;

ISAGOO ARKAY: Xeer Lam. 144 soona baxay 23kii Maajo 1971

*ISAGOO ARKAY:* Xeer Lam. 144 soona baxay 23kii Maajo 1961kii,

*ISAGOO ARKAY:* Arjigii ay keensadeen Axmed Xuseen Qaasim iyo Cali Xuseen Qaasim taariikhdu markay ahayd 22.7.1960, kuna weydiisteen dhismo, Cad dhul Dawladeed, ku yaal Muqdisho, Xaafadda Hodan kuna dhacaya qaybta VII. Estern,

ISAGOO ARKAY: Naadada dhulka, kuna saabsan cad dhul ah, la weydiistay, ogeysiis ahaana loogu dhajiyey looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda Lam. 7620 kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horay u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo dawladda hoose ee Muqdisho, fadhigoodii 315aad taariikhdeeduna ahayd 22 Luulyo 1963;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda lam. 11924 taas oo beddeshay midaii hore oo lambarkeedu ahaa 7620 laguna aqoonsaday fadhigii 14aad ee Guddiga dhismaha Dawladda Hoose taariikhdu markay ahyad 22 Jannaayo 1974, kuna saabsanayd dhismo Guri;

ISAGOO ARKAY: Bolleetada lam. 15806 ee 8 SETT. 1963, kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddeynaysa in Axmed Xuseen Qaasim iyo Cali Xuseen Qaasim u bixiyeen lacag dhan Sh. SO. 1.884 kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO ARKAY: dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 2.564 loona tiriyey Axmed Xuseen Qaasim iyo Cali Xuseen Qaasim sida ku cad xaashida ay ku qortay Waaxda Farsamada dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 22.11.73;



ISAGOO ARKAY: Xaqiijintii Farsamada ka tirsan Waaxda dhismaha iyo Dhulka, taariikhdeeduna ahayd 24.7.1976, taas oo caddeynaysa in saqshadda dhismaha oo ay oggolaadeen Guddiga dhismaha iyo ee Dawladda Hoose ee Xamar lam. 11924 ee 30.1.1974, laguna haqiijiyey sida ay nayshaddu Guriga waafaqsan tahay.

ISAGOO ARKAY: Ooggolaanta (Nulla osta) dagganaashada guriga ku dhisan Xamar Xaafadda Hodan (Km.6) laguna siiyey xaashida Lam. 2834 ee 12.7.1976 ee Dawladda Hoose ee Xamar,

ISAGOO ARKAY: Qoraal (Atto) lam. 3673 Reb. ee 27 Aprile 1964 lagu diiwaangeliyey Xamar 30 Aprile 1964 al N. 317, qoraai Dawladeed, Buugga 14 oo ah caddaynta Notaayada Micheal mariano taas oo Axmed Xuseen Gasim iyo Cali Xuseen Gaasim ka gadeen kuna wareejiyeen Maxamed Sheekh Axmed wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 3. 766 kuna yaal Muqdisho Xaafadda Hodan;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (Atto) Lam. 1357 Reb. taariikh 11.3.1969 lagu diiwaan geliyey Xamar 11.3.1969 al N. 184 Atti Pubblici Vol. 19 oo ah caddaynta Notaayada Dr. Cabdalla Xaaji Faarax, taas oo Cabdullaahi Cali Ducaale, oo u ah wakiil Maxamed Sheekh Axmed, wuxuu ka gaday kuna wareejiyey Cabdullaahi Diiriye Cabdi iyi Aamina Sheekh Maxamed, wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan dhulka ku fadhiya mq. 3.768 kunayaal Xamar Xaafadda Hodan;

ISAGOO ARKAY: Qoraal (Atto) Lam. 4316 Reb. taariikhdu 26 nofember 1973, lagu diiwaan geliyey Xamar 16.12.1973 1.527 Qoraal Dawladeed, Buugga 20 oo ah caddaynta Notaayada Dr. Muuse Xuseen Sadiid, Cabdullaahi Diiriye Cabdi ka gaday kuna wareejiyey (EDNA) Shukri Aadan Cismaaciil wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan barka uu ku leeyahay dhulka kor lagu soo sheegay, dhismihii ku yaalay oo ah mq. 1.254 kuna yaal Xamar Xaafadda Hodan;

ISAGOO ARKAY: In la tixgeliyey wax allaale wixii waajib ahaa, kuna saabsanaa siismaha iyo gacan u gelinta dhulka dawladeed, (Concessione e conseguente libera disponibilità oo ay ujeeddadiisu ahayd, dhis, wuxuu soo saarayaa.

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA SOO SOCDA

B) — Waxaa dhul Dawladeed la siiyey, gacana loo geliyey loona aqoonsaday (EDNA) Shukri Aadan Cusmaaciil, dhul ku fadhiya m.q. 1.254. kuna yaal muqrisho Xaafadda Hodan.

T) — Waxaa cad dhul Dawladeed gadatay Jaalle Aamina Sheekh Maxamed, oo ku yaal Muqdishi, Xaafadda Hodan kuna fadhiya mq. 1.320.

Muqdisho, 4 Agoosto 1976,

W A S I I R K A

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*W.S. Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY**

**Diiwaanèa Lam. 1 Bogga Lam. 23**

**Muqdiho, 30 Agoosto 1976.**

**Hantidhowrka Guud**

**G/Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur.**



XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD 20 Ott. 1975 cad Dhul Dawladeed la siiyey Jaalle Geedi Raaga Xasan ku yaal Muqdisho xaafadaa Hodan Jidka 26 Juunyo kuna fadhiya mq. 445,50. L. 4

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

ISAOGO ARKAY: Warqaddii 1aad iyo taa 2aad ee Kacaanka iyo Xeerka Lam. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969,

ISAGAA ARKAY: Xeerka Lam. 6 soona baxay 9 Jannaayo 1967,

ISAGOO ARKAY: Arjigii uu keensaday Geedi Raaga Xasan taariikhdu markay ahayd 4.12.1963, kuna weydiistay dhismo, cad dhul Dawladeed, ku yaal Muqdisho xaafadda Hodan, Jidka 26 Juunyo.

ISAGOO AQONSADAY: Naadacii dhulka, kuna saabsan cad dhul ah. la weydiistay, ogeysiis ahaan loogu dhejiyey looxa Dawladda Hoose ee Xamar, laguna qoray Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda lam. 4.5 soona baxay 21 Maajo 1966, iyadoo aan cidna horistaagin;

ISAGOO ARKAY: Naqshadda Lam. 845, kuna saabsan dhismo dhagaxeed oo ay horey u aqoonsadeen Guddiga dhismaha oo Dawladda Hoose ee Xamar, fadhigoodii 15. aad taariikh. 5 Maarso 1974, kuna saabsan dhismo Guri;

ISAGOO ARKAY: Bolleetada Lam. 141350 ee 31.3.1974 kana soo baxday Xafiiska Canshuurta Dadban, taas oo caddaynaysa in Geedi Raaga Xasan uu bixiyey lacag dhan Sh. SO. 668,25 kuna saabsan qiimaha dhulka oo dhismaha loo siiyey;

ISAGOO AQOONSAN: dhulka la weydiistay, kuna fadhiya mq. 1.040,15 loona tiriyey Geedi Raaga Xasan sida ku cad xaanshida ay qortay Waaxda farsamada dhulka (Verbale di consegna) taariikhdeeduna ahayd 14.4.1974;

ISAGOO ARKYA: Warqadda ku qoran qaynuunka siismaha dhulka iyo Naqshadda oo tilmaameyso dhulka isaga ah;

Waxaa cad dhul Dawladeed ah la siiyey Geedi Raaga Xasan, oo ku yaal Muqdishi, Xaafadda Hodan Jidka 26 Juunyo kuna fadhiya mq. 445,50.

Maauqdisho, 20 OTT. 1975.

X O G H A Y A H A

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

*K.S. Inj. Maxamed Xawaadle Madar*

**WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINAY**

**Diiwaan lam. 1 bogga Lam. 32**

**Muqdisho, 19 Nof. 1975.**

**Hantidhawraha Guud**

**W.S. G/Dhexe Cabdullaahi Warsame Nuur.**

XEER WASAARADDA GANACSIGA ee 20.10.76 qiimaha ay ku iibinayso Warshadda «ALBA» biyaha Mineraalka L. 5

WASAARADDA GANACSIGA

MARKUU ARKAY: Xaashida 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969,

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. yahay 17 oo soo baxay 17kii Juun 17967 ee ku saabsan ilaalinta qiimaha alaabta lagama maarmaanka ah;

MARKUU ARKAY: In loo baahan yahay in kor loo qaado qiimaha biyaha Mineraale oo ay soo saarto Warshadda Alba, iyadoo la tixgelinaayo ascaarta alaabta ceeriinka ah ee Warshadda ku shaqayso.

WUXUU DEJINAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Qiimaha ay ku iibinayso warshadda Alba biyaha Mineraalka ay soo saarto wuxuu noqonayaa sida aanu u qoynay ee hoos ku qoran:

| | | | |
|---|---|---|---|
| Dhalada Weyn | Sh. So. | | 0.55 |
| » Yar | » | » | 0,30 |

Qodobka 2aad

Xeerkan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, wuxuu tirayaa xeer kasta oo ka soo horjeeda. Waxaa laga codsanayaa qof waliba in uu dhowro, dadka kalena dhawrsiiyo xeerkan isaga ah.

Muqdisho, 20.10.76

WASIIRKA DAWLADDA
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Cali Shire)*



## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKEMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

HADDU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga Ganacsiga Ummadda — Laanta Hargeysa;

HADDUU ARKAY: Qodobka 69 D.L. 9.9.65 N. 2;

WUXUU CADDAYNAYAA

Lumidda jeegga wareega ee Lam. 92977, kuna qoran tahay lacag dhan Sh. So. 17.400, iskana leedahay Aamina Cilmi Bulxan, sida ku cad ogeysiiska Bankiga.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo jeegga wareega oo kor ku qoran gabadha magaceedu kor ku xusan yahay, 15 maalmood ka dib marka amarkan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga wareega oo cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Aamina Cilmi Bulxan, ama qof isla ayada ka sita wakaalad Sharci ah ayadoo la sugayo muddada 15ka maalmood ah ee kor ku xusan

Xama, 5.8.1976,

*Guddoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir*
*(Jaalle Cabdullaahi Daahir Barre)*

*L. 1*

MAXKAMADDA DEBMADA QARDHO

Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada Qardho:

HADDU ARKAY: Warqaddii dacwaada ee uu soo qortay Jaallaha magaciisu yahay Axmed Weyrax Maxamuud, deggan Degmada Qardho.

MAXKAMADDU Markay aragtay: dacalkii asayada Lam. yahay 19838 ee taariikhdeeduna ahayd 8.12.75, ee jeeggaas aykuqornayd lacag dhan Sh. SO. 305 kuna dhumay degmada Qardho, jeeggaas oo horey ugu sameeyey Bankiga Ganacsiga Ummadda ee Degmada Qirdho.

MAXKAMADDA Markay Aragtay Qodobka 69 dekereto Lejislatii ee 9.9. 65 Lam. 2

Waxay amraysaa inaan la aqoonsan karin jeeggaas Lambarkiisu kor ku qoran yahay kuna qorsaa magaca jaalle Axmed Weyrax Maxamuud. Maxkamddu waxay oggolaatay in loo celiyo lacagtaas Jaalle Axmed Weyrax Maxamuud markay dhammaato 30 beri laga soo bilaabo, maalinta lagu qoro dekeretadan Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, isla markaas waxaa la marayaa Jaalle Axmed Weyrax Maxamuud in uu geliyo Faafinta Sharciga bixinaya kharajka Faafinta. Waxaan amraynaa Bankgia Ganacsiga Laanta Degmada Qordho, in uu ku dhejiyi dekeretadaan derbiyada Xafiiska Muddo 30 beri

Qardho, 29.11.76,

Guddoomiyaha Maxkamadda Deg. Qardho:
*(Jaalle Cabdullaahi Maxamuud Ciise)*

*L. 2*



GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA

HADDU ARKAY: weyaiinta horey ku qoran;

HADDU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga Ganacsiga Ummadda — Laanta 2aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2;

WUXUU CADDEYNANYY

Lumidda buug kayd Lam. 7403 oo ay ku qornayd lacag dhan Sh. SO. 15.618,00 iskana lahaa Xuseen Faarax Siyaad;

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo buug kayd cusub beddelki kii ka lumay ninka magaciisa kor ku qaran yahay, kadib 30 maalmood markii ay ka soo wareegto kolka amarkan lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buug kaydka cusub oo la samayn doono gacanta laga saaro Xuseen Faarax Siyaad ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah iyadoo la sugaayo 30ka maalmood ee kir ku xusan.

Xamar, 5.1.1977,

Garsooraha Maxkamadda Gobolka
*Dr. Cabdirisaaq Geelle Yuusuf*

*L. 3*

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE

KOLKAY ARAGTAY: Codsiga qoraalka ah uu keensaday Cabdullaahi Maxamed Maxamuud kuna saabsan lumid buug kayd L/1 (hal) ku qornayd 1.800 kun iyo Siddeed) boqol oo shilin.

MARKII AY ARAGTAY: warqad L/la'aanta ah ee taariikhdeedu tahay 9.11.76 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga Laanta Marka laguna sugay in buugga lambarkiisu kor ku xusan yahay ku jirtay 1.800 Sh. SO. uu lahaa Jaalle Cabdullaahi Maxamed Maxamuud,

KOLKAY ARAGTAY: Qod. 69 D.L. 2, taa, 9.9.1965:

WAXAY CADDAYSAY

Lumidda buugga Lam. 1 kuna qornayd 1.800 Sh. SO. waxay amartay in la baabi'iyo loona cusboonaysiiyo Cabdullaahi Maxamed aMxamuud Buugguus 30 beri kaddib markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah, waana in gacanta laga saaro isaga ama qof isla isaga wakaalad ka wata.

Marka, 5.1.1977,

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Sh. Hoose
*(Jaalle Sheekh Mukhtaar Cali Cabdiraxmaan)*

L. 4



MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: Qid. 69 D.L. 9.9.65 N. 2; lumidda jeegga wareeg ah oo lam. 514709 ayna ku qoran tahay Sh. SO. 11.000 yaal Bankiga Ganacsiga Ummadda.

WUXUU ARRAYAA

In loo cusboonaysiiso jeegga wareega kaddib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle Maxamed Cabdi Geelle ama qof isla isaga ka sita wakaalad sharci ah, iyadoo laga sugaayo muddada 15 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 2.1.77,

Guddoomiyaha Maxkamadda Gob., Banaadir
*(Jaalle Dr. Cabdirisaaq Geelle Yuusuf)*

L. 4/bis

## GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran:

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga Ganacsiga Soomaaliyeed — Laanta 1aad eeg warqad L.6 wuxuu ogaaday inay shaqadiisa tahay.

HADDU ARKAY: Qodobka 69 D.L. 9.9.65 N.2;

WUXUU CADDAYNAYAA

Lumiada buugga L. 11575 oo ay ko qornayd Sh. SO. 300 saddex-boqol) taariikh.

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo Buug kayd oo cusub ninka la liraahdo Cabdi Yuusuf Kulan oo ah ninkii iska lahaa Buugga lumiddiisa kor lagu soo sheegay kaddibmarkii 30 casho ka soo wareegto maalinta Faafinta Rasmiga ah lagu soo shaaciyi.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buuggaas cusub oo la samayn doono gacanta laga saaro Cabdi Yuusuf Kulan ama qof isaga ka haysta wakaalad sharci ah, iyadoo la sugayo in muddo 30ka casho ah dhammaatay

Muqdisho 29.12.76,

Garsooraha Maxkamadda Gobolka
*(Jaalle Dr. Cabdirisaaq Geelle Yuusuf*

L. 4/bis